

Miisaaniyadda FY25 - Warkii u Dambeeyay ee March 2024


To: All Staff and Families (standalone)

Date: Friday, March 22 (Advance copy to principals on Thursday, March 21)

Mawduuca: Warkii u Dambeeyay ee Miisaaniyadda SPPS: March 22, 2024

Bulshada Mudnaanta leh ee Saint Paul Public Schools,

Hoggaamiyeyaasha Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) iyo shaqaalaha degmada oo dhan waxay kulmayeen tan iyo xagaagii la soo dhaafay si loo abuuro miisaaniyad sannadka soo socda oo loo siman yahay, isku dheellitiran, oo ka tarjumaya waxyaalaha mudnaanta waxbarasho u leh bulshadeena. Iyada ay dhaceen [kulamo ballaaran](#) oo la qabtay gu'ga iyo dayrta 2023, waxaan ogaanay in ardaydeena, qoysaskeena, shaqaalaha iyo xubnaha bulshada ay qiimeeyaan iskoollo nabdoon, ixtiraam leh, oo ka tarjumaya dhaqamada kala duwan ee ardaydeena iyo baahiyaha waxbarasho. Waxyaalahan muhiimadda waxbarasho idiin leh, iyo sidoo kale mudnaanta waxbarasho ee la saarayo akhriska, waxay hageen go'aannada ku saabsan miisaaniyadda sannadka soo socda. Miisaaniyadda sannadka 2025 (FY25) waa in ay ansixiyaan Guddiga Waxbarashada bisha June.



Bishii February, waxaan idinla wadaagnay liistada qaar ka mid ah barnaamijyada ay SPPS qorsheyneyso inay sii waddo sannadka soo socda. Waxaan sidoo kale idinla wadaagnay in SPPS ay filayso nusqaan lacag dhan \$107.5 milyan, taas oo ay ugu wacan tahay dhammaadka lacagaha Qorshaha Samatabixinta Mareykanka (ARP) dabayaaqada sannadkan. Barnaamijyada ku jira liiskan waxaa lagu soo xulay iyadoo lagu saleynayo sida ay u taageeraan waxyaalaha mudnaanta waxbarasho idiin leh ee kor lagu xusay, iyo sidoo kale saameynta ay ku leeyihiin natiijooyinka ardayda ee ku saleysan xogta la heli karo. Fadlan tixraac [Warkii u Dambeeyay Miisaaniyadda ee February 2024](#) wixii xog dheeraad ah.

Hoos u dhigista kharashyada iyadoo la joojinayo ama hoos loo dhigayo noocyada barnaamijyada baxo waa arrin adag misana lagama maarmaan ah marka aynu wajahayno hoos u dhac miisaaniyadeed oo xajmigan leh. Go'aamada ilaa iyo hadda la gaaray ayaa lala kaashaday aragtida dad badan oo miiska wadahadalka joogay iyo saacado badan oo dood iyo falanqeyn ah. Waqtigan xadirka ah, waxaan aqoonsannay \$71.3 milyan oo laga dhimayo labada barnaamijyo ee uu midna ku shaqeeyo maalgelinta ARP, barnaamijyada kalena ay ka socdaan degmada oo dhan. Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah waxyaalaha hoos loo dhimay.

Soo Koobidda Barnaamijyada la Yareynayo ama loo Joojinayo Sannad-Maaliyadeedka 2025 (FY25)

Barnaamij/Adeeg	Sharraxaad	ARP Maalgelin ah
Elementary Job-Embedded Professional Development (JEPD)	Barashada xirfadeed ee macallimiinta dugsiga inta lagu jiro saacadaha iskoolka ee u aaddan yoolasha degmada ee xisaabta iyo wax akhriska. Khabiirro ayaa dhigo fasallada inta lagu jiro wakhtiga JEPD.	Haa
Shaqaalaha Dheeraadka ah ee Nadiifinta Iskoolada iyo Shaqaalaha kale ee Dhismaha Daryeelo	Shaqaalaha nadiifinta ee dheeraadka ah iyo shaqaalaha farsamada oo bixinayo adeegyada nadaafadda iyo dayactirka ee la xoojiyay.	Haa
Wadashaqeynta Bulshada ee Maalgelinta ARP	Wadashaqeyn lala yeeshay 39 ah ururada bulshada si ay u bixiyaan adeegyo iyo fursado ah kobcinta ardayda.	Haa
Barnaamijka Dugsiga Dhexe ee Flipside (Waa la yareyn)	Waa fasallada kobcinta ee farshaxanka, sayniska, tikniyoolajiyadda, caafimaadka, jimicsiga iyo dhaqanka ee iskoolka ka dib ka baxo dugsiyada dhexe ee SPPS.	Haa
Shaqaalaha Maktabadda ee Dheeraadka ah	Waa shaqaalaha dheeraadka ah si ay u taageeraan maktabadaha dugsiyada hoose oo markii hore ahaa kuwo shaqaale la'aan ah ama ay shaqaalaha ku yaraayeen.	Haa
Barnaamijyada Waxbarashada Dadweynaha ee Bilaashka ah	Barnaamijyada kobcinta ee kharash la'aanta ah ee loogu talagalay da' yarta inta lagu jiro saacadaha iskoolka ka baxsan.	Haa
Soo Kabidda Dhibcaha Dugsiga Sare ee Fasallada 9-12 inta lagu jiro Saacadaha Iskoolka	Waa taageeridda inta lagu jiro saacadaha iskoolka ee ardayda dugsiga sare ee ka diiwaangashan soo kabidda dhibcaha maqan.	Haa
Kaabayaasha Tiknoolojiyadda	Waxaa jiro shaqaale dheeraadka ah, qandaraasyo iyo ilo kale oo lagu taageerayo baahida tikniyoolajiyad ee degmada oo dhan.	Haa
Shaqaaale Dheeraad ah ee Adeegyada Nafaqada	Waa maalgelin loogu talagalay khubarada eegta tayada cuntada iyo shaqaalaha safka hore ku jiro xagga adeegyada si ay u buuxiyaan shuruudaha qawaaniinta adeegga cuntada xilliga cudurrada saf-marka aj.	Haa
Istaraatiijiyadaha kale ee Maalgelinta ARP iyo Yaraynta Shaqaalaha Waaxaha	Waa adeegyada cuntada iyo agabka dhismayaasha, xisaabta Math Winn, barnaamijka EDL+, iyo taageeridda hawlaha xafiiska dhexe ee istiraatiijiyado badan oo ARP ah.	Haa
Fursadaha Waxbarashada Dheeraadka ah	Waa yaraynta taageerada ka baxdo iskoolka ee hirgelinta hindisaha <i>SPPS Achieves</i> iyo qorshayaasha hagaajinta joogtada ah ee iskoolka.	Maya
Kaalinta Tababaraha Macallin ee Technology TOSA Roles (Shift)	Waa qaab cusub oo lagu taageerayo tikniyoolajiyadda oo loo adeegsado waxbarashada fasalka.	Maya

Qalabka Waxbarashada ee Dijital ah (Waa la yareyn)	Waxaa la yareyn kharashka kirada bishii e dhijitaalka ah iyo aaladaha waxbarashada onlaynka tooska ah ee ay ardayda ka heli karaan iPad-yadooda.	Maya
Qandaraasyo Dheeraad oo Bannaanka ah	Waa qandaraasyo loogu talagalay adeegyada taageerada dheeraadka ah ee iskoollada iyo waaxaha.	Maya

Markii la isu geeyo kharashyadaan la dhimay, degmada SPPS wali waa inay \$36.2 milyan oo dheeri ah hoos u sii dhigtaa miisaaniyaddeena si loo gaaro miisaaniyad isku dheellitiran oo loogu talagalay sannad-dugsiyeedka FY25. Xogtan waxaa sidoo kale lala wadaagay 19-kii March, 2024, Kulanka Guddiga Waxbarashada. Waxaad [ka daawan kartaa bandhiggidda oo buuxda halkan](#).

Go'aamo badan oo adag ayaa loo baahan doonaa in la gaaro bilaha soo socda si SPPS ay u soo bandhigto miisaaniyad isku dheellitiran si loo ansixiyo bisha June. Maadaama uu qiyaastii kharashkeennu 80% ku baxo shaqaalaheenna, tani waxaa ka mid noqon doonto joojinta shaqooyinka ka socdo heer degmo iyo heer iskool labadaba. Inta uu hannaankan sii socdo, waxaan sii wadeynaa inaan diiradda saarno gaarista miisaaniyad dheellitiran oo u adeegaya ardaydeena oo sidoo kalena taageerayo himiladeenna dhiirrigelinta in ardayda ay noqdaan kuwo maskaxda ka shaqeeyo, oo raadiyo himiladooda, dunidana wax ka beddelo.

Maxaa dhacaya intaa ka dib?

Iskoolladu waxay toddobaadkan heli doonaan miisaaniyaddooda ah sannad-dugsiyeedka soo socda. Marka dejinta miisaaniyadaha la dhammeeyo ka dib fasaxa gu'ga, iskoolladu waxay ku casuumi doonaan qoysaska kulamo xog-bixin ah si ay ula wadaagaan miisaaniyaddooda sannad-dugsiyeedka 2025 (FY25) iyo isbeddellada la xiriiro shaqaalaha. Qoysasku waa inay uu tog hayaan xogo dheeraad ah oo iskoolkaaga ka imaanayo oo ku saabsan kulamadan la qaban doono April iyo May.

Wararkii hore ee miisaaniyadda iyo xogo kale waxaa laga heli karaa spps.org/fy25budget. Waxaad kale oo aad isticmaali kartaa Foomka [Jawaab-celinta Miisaaniyadda ee Sannad-Miisaaniyadeedka 2025 \(FY25\)](#) si aad u qortid faallooyinka ama su'aalaha laga yaabo in lagu daro bogga degmada ee su'aalaha soo noqnoqda.